



Masuuliyaadka iyo Xuquuqda Qofka wax ka Barta AMEP (Barnaamijka Waxbarashada Soogalootiga Dadka waaweyn)

Xuquuqdaada

Cidda bixisa barnaamijka AMEP ahaan waxaanu:

- Ku siin doonaa tababarka luqada Ingiriiska oo tayadeedu aad u sarayso si lagaaga caawimo degitaankaaga Australiya.
- Waxaanu kugu siin doonaa bay'ad waxbarasho oo kaalmaynaysa amaana ah iyo shaqaale si wanaagsan u leh xirfad iyo waaya-aragnimo.
- Waxaanu u qadarin doonaa welwelkaaga iyo dacwadaada si dhab ah waxaana wax uga qaban doona si degdeg ah.
- Waxaanu kuula dhaqmi doonaa si xaq ah, ixtiraam leh dhaqan ahaana la aqbali karo.
- Waxaanu kuu samayn doonaa dhaba waxbarasho oo shakhsiyeed si waafaqsan baahidaada, xirfadahaaga, hadafkaaga iyo xaalladaada shakhsiyeed.
- Waxaanu kuu gudbin doonaa adeegyada kaalmada iyo degitaanka waxaana ku tusi doonaa barnaamijka AMEP wixii kugu haboon.
- Waxaanu ku siin doonaa daryeel ilmood oo lacag la'aana dhaqankana ku haboon (kuwa ka yar da'da dugsig) intaad dhiganayso xiisadaha barnaamijka AMEP.
- Waxaanu kugu dhiirgelineynaa inaad ka faaidaysato inta ugu badan barnaamijka AMEP.

Masuuliyaadkaaga

Macmiile AMEP ahaan waxaa lagaa filayaa:

- Inaad timaado oo ka qaybgasho xiisadaha, dhamaystirto shaqada guriga qaadona masuuliyada waxbarashadaada.
- Inaad la xiriirto la-taliyaha barnaamijka AMEP haddii aadan awoodin imaanshaha xiisada sabab uun.
- Inaad noo sheegto haddii aad doonayso inaad ka baxdo barnaamijka AMEP.
- Inaad ula dhaqanto macalimiinta, la-taliyayaasha AMEP, ardada kula dhigata iyo kuwa kale siwanaagsan, ixtiraam leh oo dhaqanka waafaqsan.
- Raac talaabooyinka lagu cayimay ee Tusaha Wadada Shakhsiyeed una sheeg la-taliyaha AMEP haddaad doonayso inaad wax isbedel ah samayso.
- U shaqay si waafaqsan nadaamka iyo hab-dhaqanka ardayga.